# Ururka Qareenadda Somaliland.

## Somaliland Lawyers Association (SOLLA).

## Xeerka Ururka.
## The Constitution.

**Shirweynaha 6aad**
**$30^{th}$ – $31^{st}$ July 2025.**
**Hargaysa.**
**Jamhuuriyada Somaliland.**



Somaliland lawyers association ★ Ururka Qareenada Somaliland ★ (SOLLA)

TUSMADA XEERKA

Qodobka 1aad: Eray-Bixinta Xeerka. ....4
Qodobka 2aad: Magaca Ururka ....4
Qodobka 3aad: Astaanta & Calanka Ururka. ....4
Qodobka 4aad: Xarunta Ururka ....5
Qodobka 5aad: Dabeecadda Ururka ....5
Qodobka 6aad: Ujeedooyinka Ururka. ....5
Qodobka 7aad: Shuruudaha Xubinnimadda Ururka. ....5
Qodobka 8aad: Xuquuqda Xubinta ....6
Qodobka 9aad: Waajibaadka Xubnaha. ....7
Qodobka 10aad: Sababaha lagu waayi karo Xubinimadda. ....7
Qodobka 11aad: Qaabdhismeedka Ururka. ....7
Qodobka 12aad: Shirweynaha. ....7
Qodobka 13aad: Habka Loo Qabanayo Shirweynaha. ....8
Qodobka 14aad: Awoodda iyo Waajibaadka Shirgudoonka ........ **Error! Bookmark not defined.**8
Qodobka 15aad: Awoodaha Shirweynaha. ....10
Qodobka 16aad: Fadhiyada iyo Go'aamadda Shirweynaha. ....11
Qodobka 17aad: Gudida Hogaaminta (BoD) ....11
Qodobka 18aad: Shuruudaha Murashaxiinta Guddida Hogaaminta. ....12
Qodobka 19aad: Awooda Gudida Hogaaminta ....12
Qodobka 20aad: Qaab-dhismeedka Guddida Hogaamlnta. ....13
Qodobka 21aad: Masuuliyadda Gudoomiyaha. ....14
Qodobka 22aad: Masuuliyadda Gudoomiye Ku-xigeenka 1aad. ....14
Qodobka 23aad: Masuuliyadda Gudoomiye Ku-xigeenka 2aad. ....15
Qodobka 24aad: Masuuliyada Xoghayaha Guud. ....15
Qodobka 25aad: Fadhiyadda Guddida Hogaaminta. ....16
Qodobka 26aad: Waayidda Xubinnimada Gudida Hogaaminta & Habka Buuxinteeda. ....16



Somaliland lawyers association ★ Ururka Qareenada Somaliland

Qodobka 27aad: Agaasinka Fullinta ee Ururka....17
Qodobka 28aad: Musuuliyadaha Agaasinka Fulinta....18
Qodobka 29aad: Masuuliyadda Agaasimaha Fullinta (Executive Director) ....18
Qodobka 30aad: Masuuliyadda Madaxa Barnaamijyadda....18
Qodobka 31aad: Masuuliyada Madaxa Maamulka Iyo Lacagta....18
Qodobka 32aad: Laamaha Ururka....19
Qodoka 33aad: Qaybaha iyo Waaxyaha....19
Qodobka 34aad: Dhaqaalaha Ururka....19
Qodobka 35aad: Hantidhawrka ururka....19
Qodobka 36aad: Shaqadda Xilalka Ururka....20
Qodobka 37aad: Wax ka bedelka Xeerka Ururka....20
Qodobka 38aad: Aasaasayaasha Ururka....20
Qodobka 39aad: dhaqangalka Xeerka Ururka....20

## Qodobka 1aad: Eray-Bixinta Xeerka.

1. **Urur:** Waxaa loola jeedaa Ururka Qareenadda Somaliland "Somaliland Lawyers Association" (SOLLA).
2. **Qareen:** Waxaa loola jeedaa Qareenka ruqsad qareenimo ka qaatay Guddida Ruqsad bixinta iyo Anshax marinta Qareenadda JSL si waafaqsan wax ka bedelka iyo kaabista Xeerka Qareenadda **JSL Xeer Lr: 30/2004,** isla markaana xubin ka ah Ururka Qareenadda JSL (SOLLA).
3. **Xeer:** Waa Xeerka (Constitution) Ururka Qareenadda Somaliland (SOLLA).
4. **Shirweyne:** Waa awoodda ugu sareysa ee ururka ee ay ku kulmaan dhamaan xubnaha Ururka isla-markaana ku doortaan hogaanka sare ee Ururka.
5. **Gudidda Hogaaminta (BoD):** waa Awoodda labaad ee ururka laguna soo doorto Shirwaynaha Ururka.
6. **Guddida Fulinta:** Waxaa loola jeedaa Guddoomiyaha, Ku-xigeenadiisa iyo Xog-hayaha Guud ee Ururka Qareenadda Somaliland (SOLLA).
7. **Agaasinka Fulinta:** Waa xubnaha haya hawl maalmeedka Ururka ee uu hogaaminayo Agaasimaha Fulinta (Executive Director).
8. **Mihnadda:** Waa xirfadda Qareenimo ee uu ku shaqaysto qofka sharciyaqaanka ahi.
9. **Laamaha:** Waxaa loola jeedaa xarumaha Goboladda uu ku leeyahay Ururku.
10. **Guddi Hoosaad**: Waxaa loola jeedaa gudiyadda shaqo ee uu u qaybsamo Gudida Hogaamintu (BoD).

## Qodobka 2aad: Magaca Ururka

Magaca ururku: waa Ururka Qareenadda Somaliland (Somaliland Lawyers Association) oo loo soo gaabiyo SOLLA.

## Qodobka 3aad: Astaanta & Calanka Ururka.

1. Astaanta Ururka waxaa loo sawiraa: "Kitaab kala furan oo midabka xaashiyahiisu yihiin huruud, layman madoowna ay dhexmarayaan, cidhifyadda kitaabka waxaa ku wareegsan layn midabkiisu yahay madaw, kitaabka waxaa kor saaraan miisaan ay labadiisa kafadood midabkoodu yihiin casaan, xadhkahooduna yihiin midabka dooga (akhtar). Miisaanka badhtankiisa waxaa ku qoran magaca SOLLA oo far waawayn ah midabkeeduna madaw yahay".
2. Astaanta waxaa ku hoos qoran Magaca SOLLA oo far waawayn ah midabkeedu yahay Doog (akhtar), kuna xidhan yahay Qaws.
3. Astaantani waxay gaar u tahay Ururka Qareenada Somaliland (SOLLA).
4. Ururku wuxuu yeelanayaa calan u gaar ah, midabkiisuna yahay Cadaan labadda dhinaca ku leh layn midabkiisu yahay Doog (akhtar), dhexdana waxaa kaga taala astaanta Ururka.



Somaliland lawyers association * Ururka Qareenada Somaliland *

## Qodobka 4aad: Xarunta Ururka

1. Xarunta Ururku waxay ku taalaa Magaalo Madaxda Jamhuuriyadda Somaliland ee Hargeysa.
2. Wuxuu ku leeyahay Ururku laamo Goboladda iyo Degmooyinka Dalka.

## Qodobka 5aad: Dabeecadda Ururka.

1. Dabeecadda Ururku Waa urur xirfadeed oo ay ku midoobeen dhamaan Qareenadda Somaliland.
2. Ururka Qareenaddu waxaa kale oo uu yahay **Bar Association**-ka Somaliland.
3. Ururku Wuxuu leeyahay Shakhsiyad Qaanuuneed.

## Qodobka 6aad: Ujeedooyinka Ururka.

Ujeedooyinka Ururku Waa:

1. Middaynta dhamaan Qareennadda Dalka.
2. Ilaalinta xuquuqda Qareennadda.
3. Kor u qaadista mihnadda qareenimo.
4. Hagaajinta sumcadda qareenimada si loo abuuro kalsooni bulshadu ku qabto mihnadda qareenimo.
5. Horumarinta u adeegista macmiilka.
6. Ilaalinta sarraynta Sharciga **(Rule of Law)**, Maamul wanaagga **(Good Govenrance)** iyo xuquuqda Aadamaha **(Human Rights)**.
7. U fududaynta bulshadda marin u helidda cadaaladda **(Access to justice).**
8. Horumarinta aqoonta iyo xirfada Qareenada dalka.
9. Iftiiminta qabyooyinka sharci ee dalka ka jira iyo katalo bixinta sidii xal loogu heli lahaa.

## Qodobka 7aad: Shuruudaha Xubinnimadda Ururka.

1. Xubnaha ururku waxay ka koobnaan doonaan 2 qaybood oo kala ah:
   a) Xubin rasmiga ah &
   b) Xubin sharafeed.
2. Xubnaha rasmiga ah ee ururka qareenadda waxaa ka mid noqonaya:
   a) Xubnaha ka diiwaangashan ururka Qareenada Somaliland (SOLLA) ee hore loo ansixiyey ama ka qaybgalay Shirweyneyaashii hore ee ururka ee lahaa xaqqa codbixinta, isla markaana aan ku sifoobin sifooyinka lagu waayo xubinimada ururka.
   b) Waxaa xubin rasmi ah oo Ururka Qareenada noqonaya: Garyaqaan kasta oo ka soo qalinjebiyey Jaamacad (Kuliyadda Sharciga) dalka laga aqoonsan yahay ama Garyaqaan kasta oo leh khibrad shaqo mihnadda Sharciga ah oo noqday Ku-xigeen Xeer Ilaaliye Guud ama Garsoore Maxkamad Rafcaan muddo aan ka yarayn **5 Sanadood** ama Garsoore Maxkamad Degmo muddo aan ka yarayn **10 sanno,** Waxaana shardi ah inuu codsi is-diiwaangelin ah u soo qorto Ururka.



Somaliland lawyers association ★ Ururka Qareenada Somaliland ★

3. Xubin sharafeedka:
   a) Ururku wuxu yeelan karaa xubno sharafeed marka ay soo jeediyaan Guddida Fulinta ururku ayna Oggolaato Guddida Hogaamintu.
   b) Ururka waxaa xubin sharafeed ka noqon kara:
      1. Garsoorayaal hore oo garsoorka ka gaadhay Maxkamad Sare/racfaan oo aan ku shaqaysan mihnada qareenimo.
      2. Qareeno hore oo hawlgab ah waayo aragnimo dheerna u leh sharciga.
      3. Garyaqaano ajinebi ah oo aqoon dheer u leh sharciga oo dalka si sharci ah u degan ama uga shaqaysta kuwaas oo wax tar u leh ururka.
      4. Gudoomiyayaasha guddi-hoosaadka shuruucda labada gole baarlamaan.
      5. Hormuuddada Kuliyaddaha Sharciga iyo Barreyaasha sharciga ee Jaamacaddaha dalka ee aan ku shaqaysan mihnadda Qareenimo.
      6. Qof kasta oo soo maray Gudoomiyaha Maxkamadda Sare, Xeer Ilaaliyaha Guud iyo Wasiirka Cadaaladda.
   c) Xubin sharafeedku cod kuma laha shirarka ururka, laakiin ra'yigooda way ka dhiiban karaan, waanay ka qaybgeli karaan.
   d) Xubin sharafeedku xil uma qaban karo ururka.
   e) Xubin sharafeedka kuma waajib aha dhigaalka xubnaha rasmiga ah, laakiin ururka hanti ama adeeg waa ugu tabaruci karaa.
4. Xubinta ururka ku soo biiraysa waxaa shardi u ah:
   a) Waa in uu codsi qoraal ah oo ay ku lifaaqan yihiin Macluumaadkiisa iyo dhukumentiyadiisu u soo gudbiyaa Xog-hayaha Guud ee ururka.
   b) Waa in uu diyaar u yahay in uu u hogaansamo ujeedooyinka ururka.
   c) Waa in uu diyaar u yahay in uu bixiyo dhigaalka ururka.

## Qodobka 8aad: Xuquuqda Xubinta

Xubintu waxay xaq u leedahay: -

1. In la doorto waxna doorato.
2. In uu qabto xil kasta oo ka mid ah xilalka Ururka, haddii loo magacaabo ama loo doorto, haddaan qodob sharci aanuu ka reebin.
3. In uu ka qayb qaato barnaamijyada Ururku uu fulinayo.
4. In laga difaaco xad-gudubyada lagula kaco mihnaddiisa iyo naftiisaba.
5. Inuu ra'yigiisa si waafaqsan anshaxa iyo asluubta uga dhiibto tallada Ururka.
6. Fursado siman ururka dhexdiisa si waafaqsan xeerka iyo shuruudaha aqooneed ee loo baahan yahay.
7. In uu helo macluumaadka iyo xogta ururka.
8. In aqoontiisa sharci kor loo qaado.
9. In uu helo cabasho kasta oo isaga lid ku ah si uu iskaga difaaco.


Somaliland lawyers association (SOLLA) Ururka Qareenada Somaliland

## Qodobka 9aad: Waajibaadka Xubnaha.

Xubin kasta oo ka mid ah Ururka waxaa waajib ku ah in ay u hogaansanto waajibaadyaddan soo socda:

1. Bixinta qaadhaanka Joogtada ah.
2. Dhawrista Xeerka Ururuka.
3. U gudashada Xilalka si waafaqsan Xeerka Ururka.
4. Ilaalinta Sharafta iyo Karaamadda Ururka.
5. Ilaalinta Agabka iyo Hantida Ururka.
6. Fulinta awaamiirta iyo go'aanadda ururka.
7. Inuu ka difaaco Ururka cid kasta oo waxyeelaynaysa danaha ururka iyo madax-banaanida mihnadda qareenimo.
8. Ilaalinta Anshaxa mihnada Qareenimo iyo inuu u hogaansamo Xeer-hoosaadka Nidaamka Anshaxa ee uu dejiyey ururku (Code of Conduct).
9. Ilaalinta Xogta iyo sirta Macmiilka.

## Qodobka 10aad: Sababaha lagu waayi karo Xubinimadda.

Xubinimadda Ururka waxaa lagu waayi karaa arrimahan soo socda:

1. Hadduu u hogaansami waayo Xeerka iyo Dastuurka Ururka, laguna anshax-mariyo.
2. Hadduu bixin waayo qaadhaanka Ururka Sabab la'aan muddo Saddex Bilood oo xidhiidh ah.
3. Hadduu is-casilaad uu u gudbiyo Xog-hayaha Guud ee Ururka, kana aqbalaan Guddida hogaaminta Ururku (BoD).
4. Geeri Ku timaada xubinta.
5. Iyada oo uu qabto ama loo magacaabo xil qaran oo ka mid ah Waaxyaha Qaranka.
6. Haddii uu galo dambiyadda la xidhiidha anshaxa sida Musuq-maasuq, laaluush iyo Tuugo kuna dhaco Xukun Maxkamadeed oo kama-dambays ah.

## Qodobka 11aad: Qaab-dhismeedka Ururka.

Qaab-dhismeedka ururku wuxuu ka kooban yahay:

1. Shirweynaha Ururka (General Assembly-GA).
2. Guddida Hogaaminta (Board of Directors-BoD).
3. Guddida Fulinta (Gudoomiyaha, ku xigeenadiisa iyo Xoghayaha Guud).
4. Agaasinka Fulinta oo uu hogaaminayo Agaasimaha Fulintu (Executive Director-ED).

## Qodobka 12aad: Shirweynaha.

1. Shirweynaha ururka Qareenadu waa awoodda ugu sareysa ururka.
2. Wuxuu kulmiyaa dhammaan xubnaha Guud ee ururka.
3. Mudada shirweynuhu waa **Saddexdii (3) sanoba hal mar** (shirweyne) oo caadi ah.



Somaliland lawyers association ★ Ururka Qareenada Somaliland ★

4. Markasta oo la qabanayo Shirweyne waxaa Xoghayaha Guud ee ururka ku waajib ah inuu Gudida Hogaaminta u soo gudbiyo diiwaanka xubnaha Ururka ee ansax u ah ka qaybgalka Shirweynaha.
5. Xubnaha Guddida Hogaaminta (BoD) ayaa ansixinaya liiska xubnaha cusub ee soo codsaday xubinimada ururka.
6. Xubnaha ka qaybgalaya Shirweynaha waxa waajib ah in xogtooda iyo xubinimadoodu sugan tahay.

## Qodobka 13aad: Habka Loo Qabanayo Shirweynaha.

Markasta oo la qabananayo Shirweynaha ururka waa in loo maro nidaamkan:

1. Waxaa waajib ah in Gudoomiyuha ururku magacaabo Guddida Qabanqaabadda Shirweynaha **afar (4) bilood** ka hor mudada dhamaadka muddo xileedkiisa.
2. Guddida qabanqaabadu waxay ka koobnaan doontaa todoba **(7) Xubnood** oo kala ah:
   a) Laba Xubnood oo ka mid ah Guddiga hogaaminta Ururka (BoD)
   b) Shan xubnood oo laga soo xulayo Xubnaha rasmiga ah ee Ururka.
   c) Guddoomiyaha Ururka, Gudoomiye ku xigeenadda Ururka iyo Xog-hayaha Guud midkoodna ma noqon karo xubnaha Guddiga qaban-qaabadda Shirwaynaha.
3. Fadhiga ugu horeeya ee Guddiga qaban-qaabaddda waxaa Shir-gudoomin doona Xubinta ugu da'da wayn, waxayna iska dhex-dooran doonaan Gudoomiye, Gudoomiye ku-xigeen & Xog-haye.
4. Shuruudaha laga doonayo Xubinta Guddida qaban-qaabaddu waxay la mid tahay Shuruudaha laga doonayo Xubnaha Shir-gudoonka ee ku xusan **farqadda 7aad** ee Qodobkan xarafaha (a, b, c).
5. Guddiga qaban-qaabadda Shirwaynuhu waa in ay qabsadaan fadhigooda ugu horeeya toban **(10) cisho gudahood** oo ka bilaabma maalinta la ansixiyo.
6. Gudidda Qabanqaabaddu waxay leedahay Awooddaha iyo Masuuliyaddahan soo socda:
   a) Fulinta miisaaniyada ay Guddida Hogaamintu u qorsheeyeen qabashada shirweynaha.
   b) Guddida qaban-qaabadu waa in ay u raacaan fulinta Miisaaniyadda loo qorsheeyey qabashadda Shirwaynaha Ururka hab waafaqsan Xeer hoosaadka dhaqaalaha Ururka **(Financial procedural manual).**
   c) Diyaarinta iyo baahinta Madasha iyo wakhtiga la qabanayo Shirwaynaha.
   d) Samaynta, qaabaynta, qaybinta iyo daabacaadda kaadhadhka ergooyinka iyo Marti-sharafta ka soo qaybgalaya Shirwaynaha.
   e) Diyaarinta dhamaan agabka shirwaynaha.
   f) Ururinta qaadhaanka lagu qabanayo Shirwaynaha haddii aanay jirin miisaanad u diyaarsan oo loo qorsheeyey qabashadda Shirwaynaha, waxaana Shirwaynaha ka qayb gali kara oo kaliya Xubnaha bixiya Qaadhaanka Shirka lagu qabanayo isla-markaana yeelanaya xuquuqda ah in uu wax doorto ama la doorto.
   g) Xaddidaada iyo goynta qaadhaanka lagu qabanayo shirwaynaha ee laga qaadayo



somaliland lawyers association * Ururka Qareenada Somaliland *

Xubnaha.

h) Marka ay Guddida Qabanqaabaddu ururinayso qaadhaanka waxay awood u leedahay in ay u qaybiso xubnaha ay qaadhaanka ka qaadayso laba qaybood oo kala ah: **Qaadhaan bixin dhamaystiran (100%)** oo laga qaadayo Xubnahii hore iyo **Qaadhaan bixin kala badh ah (50%)** oo laga qaadayo Qareenadda Cusub ee aan awoodin in ay bixiyaan lacagta qaadhaanka oo dhamaystiran.

i) Diyaarinta iyo samaynta warbixinta iyo xisaab celinta misaaniyadda Shirwaynaha.

j) Furitaanka Shirwaynaha.

k) Qabashadda Doorashadda Shir-gudoonka Shirwaynaha.

l) Qabashadda codsiyadda iyo hubinta buuxinta Shuruudaha Murashiixiinta u tartamaya Guddoomiyaha, Ku-xigeenadda iyo Xoghayaha Guud ee Ururka.

m) Ku wareejinta Shirgudoonka Liiska Ergooyinka (Xubnaha Rasmiga ee Ururka) ee ka qaybgalaya Shirka iyo Murashixiinta buuxiyey Shuruudaha ee u tartamaya Guddida Fulinta Ururka.

7. Habka doorashadda Xubnaha Shir-gudoonka Shirwaynaha iyo Shuruudaha laga rabaa waa sidan soo socota:-

   a) In uu ka mid ahaa Ururka muddo aan ka yarayn 10 sanno.

   b) Waa in aanu ka mid ahayn Hogaanka xilka ka degaya ama Xubnaha Guddiga qaban-qaabadda Shirwaynaha.

   c) Waa in uu ahaado xubin ku sifoowday akhlaaq wanaag iyo dhex-dhaxaadnimo.

   d) Xubin kasta oo doonaysa in ay ka qayb-gasho tartanka doorashadda Shirgudoonka waxaa ku waajib ah in ay codsi qoraal ah u soo gudbiso Guddida qaban-qaabadda.

   e) Wakhtiga la gudbinayo codsiga u tartamidda xilka Shirgudoonka Shirwaynaha waa marka la furo Shirwaynaha.

   f) Codsiga u tartamidda Xilka shirgudoonka waa in ay xubintu ku caddayso xilka ay u tartamayso.

8. Xubnaha Shirgudoonka Shirwaynuhu waxay ka kooban yihiin Gudoomiye, Gudoomiye Ku-xigeen iyo Xog-haye.

9. Gudidda qaban-qaabadu waa in ay Shirweynaha u soo bandhigaan liiska xubnaha soo codsaday inay u tartamaan Shirgudoonka, si cod gacan taag ah loogu kala saaro.

10. Boos walba gaarkiisa ayaa loogu coddaynayaa.

11. Haddii Boos walba hal qof kaliya ah soo codsado hal mar ayaa loo wada codaynayaa.

12. Haddii tiradu ka yartahay **3 xubnood**, Guddida qabanqaabada waxaa ku waajib ah inay Shirweynaha ka soo xulaan xubinta booskeedu banaan yahay ee buuxinaysa shuruudaha laga doonayey.

13. Haddii la waayo cid isu sharaxda Shirgudoonka, Gudida qabanqaabadda waxaa ku waajib ah inay Shirweynaha ka soo dhex xulaan **3 xubnood** oo kala noqda Gudoomiye, Kuxigeen iyo Xog haye, Shirweynuhuna waa inuu cod ku ansixiyo xubnaha la soo xulay.

14. Haddii la diido xubnaha Shirgudoonka dhamaan ama qaarkood, Gudida qabanqaabada waxaa ku waajib ah inay Shirweynaha ka soo xulaan bedelkooda u tartamaya buuxinta



somaliland lawyers association * Ururka Qareenada Som... (SOLA)

Shirgudoonka, Shirweynuhuna waa in uu codka ansixinta u qaado.

15. Hawsha Gudida Qabanqaabadu ama Shirgudoomintu waa tabaruc, waxaana waajib ah in si xilkasnimo iyo daacadnimo ah loo guto.
16. Xubinta gudan kari-wayda hawsha Guddida Qabanqaabadda ama Shirgudoonka waxaa lagu soo buuxinayaa qaabkii ay ku timid xubinta la bedelayaa, haddii ay lagama maarmaan noqoto buuxinteedu.
17. Xubnaha Shir-gudoonku iskuma sharixi karaan Hogaanka Ururka.
18. Hawsha iyo shaqadda Guddida qaban-qaabadda Shirwaynaha hawshoodu waxay ku ceg tahay marka la doorto Shirgudoonka, Guddoominta Shirkana waxaa kala wareegaya Shirgudoonka la doortay.

## Qodobka 14aad: Awooddaha iyo Waajibaadka Shir-guddoonka.

Shirgudoonka Shirweynaha Waa inay gutaan waajibaadyadan:

1. Daadihinta shirweynaha guud ahaan iyagoo raacaya ajendaha la ansixiyey.
2. Qorista/qaadida hadal-qoraalka shirweynaha guud ahaan, iyo dhamaystirkiisa.
3. Qaybinta hadalka iyo doodaha xubnaha si siman.
4. Go'aan ka gaadhista xubanaha ku kaca falal ka soo horjeeda habsami u socodka shirweynaha.
5. Sugitaanka Xubnaha fadhiya madasha Shirka iyo habsami u tirinta codadka.
6. Qabashada codsiyadda xubnaha soo codsadda Hogaanka Ururka oo aanay ku jirin Guddida fulintu.
7. Hubinta shuruudaha u degsan murashaxiinta hogaanka ururka (BoD).
8. Ilaalinta habsami-u-socodka shirweynaha.
9. Xubnaha iyo Ergooyinka Shirweynaha waxaa ku waajib ah inay u hogaansamaan amarradda Shirgudoonka.
10. Markasta oo ay timaado in ra'yi ama soo-jeedin lagu kala aragti duwanaado Shirgudoonka waxaa u banaan inay qaadaan Cod lagu kala baxo.
11. Ku dhawaaqidda natiijadda Doorashadda iyo cidda ku guulaysatay doorashadda Ururka.
12. Waxaa kale oo ay awood u leeyihiin in ay adeegsadaan cid kasta oo ay u baahdaan farsamo ahaan.
13. Sexeexida wax ka bedelka & kaabista xeerka Ururka, ka dib marka shirweynuhu ka doodo ee uu ansixiyo.

## Qodobka 15aad: Awooddaha Shirweynaha.

Shirweynuhu wuxuu awood u leeyahay:

1. Ansixinta ajendaha shirweynaha iyagoo awood u leh kaabis iyo wax ka badal.
2. Doorashada xubnaha shirgudoonka shirweynaha.
3. Dib u eegidda Xeerka Ururka.
4. Ansixinta Waxka-badalka iyo Kaabista Xeerka ururka.

somaliland lawyers association * Ururka Qareenada Somaliland *

5. Dhageysiga warbixinaha iyo wax qabadka Hogaanka ururka mudadii u dhaxaysay labadda shirweyne.
6. Shirweynaha waxaa u banaan inay Gudida Hogaaminta ee mudadoodu dhamaatey mid-mid wax uga waydiin karaan wax qabadkii muddo xileedkooda, haddii ay lagama maarmaan noqoto.
7. Doorashada Gudida Hogaaminta oo ka kooban: Gudoomiyaha, Gudoomiye Ku-xigeenka 1aad, Gudoomiye ku-xigeenka 2aad, Xog-hayaha Guud & 13 xubnood oo kale.
8. Diwaangalinta Xubnaha u tartamay Guddida Hogaaminta ee aan ku guulaysan tartanka, kuwaas oo noqon doona Liiska Xubnaha Kaydka ah ee Guddida Hogaaminta ee ka socda Gobolladda.
9. Soo saarista baaqyadda ku saabsan Danta Guud ee Cadaaladda ama arimaha la xidhiidha dhowrista sarreynta sharciga, Garsoorka iyo xuquuqda Aadamaha.

## Qodobka 16aad: Fadhiyadda iyo Go'aannadda Shirweynaha.

Shirweynuhu wuxuu yeelanayaa:

1. Shirweyne caadi ah oo qabsoomaya Saddexdii sannoba hal mar, kuna beegan dhammaadka muddada xilka Gudida Hogaaminta.
2. Shirweyne aan caadi ahayn wuxuu ku imaan karaa xaaladaha soo socda oo ah:
    a. Haddii ay Gudida Hogaamintu **2/3** ku soo jeediyaan qoraal sababaysan oo saxeexan.
    b. Haddii kalabadh iyo mid **(50%+1)** xubnaha Ururka ee diiwaangashani soo jeediyaan, iyagoo sababaynaya ujeedada qabashadda shirka waynaha aan caadiga ahayn.
3. Go'aanadda Shirweynaha waxaa lagu ansixinayaa cod hal dheeri ah.
4. Qaabka go'aan qaadashada Shirweynuhu waa cod gacantaag.
5. Murashaxiinta waxaa loogu codeynayaa xubin-xubin.
6. Haddii ay dhacdo in laba (2) tartame helaan cod isku mid ah waxaa lagu kala saarayaa codka Gudoomiyaha shirgudoonka.
7. Haddii Shirweynuhu ku qabsoomi waayo mudadiisii sharciga ahayd, waxaa Guddida Hogaaminta ku waajib ah in ay sababeeyaan dib u dhaca, kadibna ku dhawaaqaan muddo cayiman oo Shirka lagu qabto oo aan ka badnayn (3) bilood.
8. Mar kasta waxaa waajib ku ah Gudida Hogaaminta inay ka jawaabaan la xisaabtanka ku aadan dib u dhaca Shirweynaha iyo su'aalaha kale ee loo soo jeediyo.

## Qodobka 17aad: Guddida Hogaaminta (BoD)

1. Gudida Hogaamintu waa awoodda labaad ee ururka.
2. Mudada Xilka Guddiga Hogaamintu waa saddex (3) sannadood.
3. Ma banaana u tartamidda xilka Guddida Hogaaminta laba jeer wax ka badan.
4. Waxaa ka reebaan dhamaan Xubnaha Guddiga Hogaaminta ka mid noqoshadda Xisbi/Urur siyaasadeedyadda, ololeyaasha siyaasadda iyo u adeegsiga hantidda iyo magaca ururka arrimo siyaasadeed iyo kuwo reereed ama qabiil.



Somaliland lawyers association
Ururka Qareenada Somaliland

## Qodobka 18aad: Shuruudaha Murashaxiinta Guddida Hogaaminta.

1. Qof kasta oo isku sharaxaya Guddida Hogaaminta gaar ahaan Gudoomiyaha, Gudoomiye Ku-xigeenadda iyo Xoghayaha Guud waxaa shardi u ah:
   a) In uu ka mid ahaa Ururka Muddo 10 sanno ah.
   b) In uu leeyahay khibrad iyo Waayo aragnimo Maamul oo ugu yaraan 5 sannadood ah.
   c) In aanay ku dhicin talaabo anshax-marineed 5tii sanno ee u dambeeyey.
   d) In uu ku sifoobay dhawrsanaan iyo akhlaaqad wanaag.
   e) In uu soo gudbiyo caddaynta dambi la'aanta.
   f) In uu soo gudbiyo caddaynta caafimaadka maskaxeed.
   g) In uu soo gudbiyo caddaynta bixinta Ajuuradda Murashaxnimadda.
   h) Waa in aanay da'diisu ka waynaan 70 sanno.
2. Qof kasta oo isku sharaxaya Guddida hogaaminta (BoD) oo aanay ku jirin Guddoomiyaha, Ku-xigeenadiisa iyo Xoghayaha Guud waxaa shardi u ah:
   a) In uu ka mid ahaa Ururka Muddo 4 sanno ah.
   b) In uu leeyahay khibrad iyo Waayo aragnimo Maamul oo ugu yaraan 3 sannadood ah.
   c) In aanay ku dhicin talaabo anshax-marineed Saddexdii sanno ee u dambeeyey.
   d) In uu ku sifoobay dhawrsanaan iyo akhlaaqad wanaag.
   e) In uu soo gudbiyo caddaynta dambi la'aanta.
   f) In uu soo gudbiyo caddaynta caafimaadka maskaxeed.
   g) Waa in aanay da'diisu ka waynaan 70 sanno.

## Qodobka 19aad: Awooddaha Guddida Hogaaminta

Gudida hogaamintu waxay leeyihiin awoodahan soo socda:

1. La xisaabtanka Gudida fullinta ee ururka (Guddoomiyaha, Ku-xigeenadiisa & Xoghayaha Guud)
2. La socodka iyo ansixinta miisaaniyadda iyo kharashaadka ururka ee sanadlaha ah iyo kharashaadka aan ku jirin miisaaniyadda hore loo ansixiyey.
3. Dejinta iyo Dhaqangelinta siyaasaddo iyo nidaamo cad oo hufan oo lagu maamulo dhaqaalaha, shaqaalaha, Xubnaha iyo guud ahaanba arrimaha kale ee waxtarka u leh maamulka wanaagsan.
4. Shaqo qorista shaqaalaha iyo erigooda si waafaqsan xeer-hoosaadka shaqaalayenta ee Ururka.
5. Awoodda soo saarista baaqyo iyo warbixino kale oo lagu muujinayo mowqifka ururka ee ku aadan arrimaha sharci ee taagan, xuquuqda aadamaha iyo arrin kasta oo kale oo taabanaysa danta guud, madax-banaanidda Garsoorka iyo danaha ururka.
6. Daba-galka iyo la socodka qorsheyaasha ay ansixiyeen ee ururka.
7. Soo saarista warbixin sanadle ah oo ku saabsan xirfadda sharciga guud ahaan iyo arrimaha kale ee khuseeya Garsoorka ee dhacay sanadkaas.

8. Maareynta dhibaatooyinka soo food-saara mihnadda qareenimo iyo xal u raadinta dhibaatooyinka haysta bahda Garsoorka guud ahaan iyo gaar ahaan Qareenadda.
9. Fulinta Ujeedooyinka iyo haddafyadda Ururku u aasaasan yahay.
10. Ansixinta Magacaabista Xubnaha Guddoomiyaha ururku u magacaabo matalaadda Ururka ee Waaxyaha Dastuuriga ah ee Dawladda.
11. Ansixinta xubnaha cusub iyo aqbalidda is-casilaadaha ee xubnaha ururka mudada labadda Shirwayne u dhaxaysa.
12. Diyaarinta ku qabashadda shirwayanaha muddadiisa.
13. Sugida tiradda xubnaha ka qaybgalaya shirweynaha.
14. Unkida iyo samaynta ajendaha shirweynaha, si looga doodo looguna ansixiyo shirweynaha.
15. Diyaarinta iyo soo bandhigista barnaamijyadii u qabsoomay muddo xileedkoodda.
16. Xadidaadda qaadhaanka waajibka ah ee bishii laga qaadayo xubnaha ururka.
17. Xadidaadda qaadhaanka laga qaadayo Murashixiinta u tartamaya Gudoomiyaha, Ku-xigeenadiisa iyo Xog-hayaha Guud.
18. Diyaarinta iyo ansixinta dhaqaalaha lagu qabanayo shirwaynaha (6) bilood ka hor muddada shirwaynaha.
19. Diyaarinta iyo Ansixinta Xeerka Anshaxa Ee ururka.
20. Magacaabista Guddidda Anshaxa ee ururka. (Habka xulashadoodda iyo waajibaadyadoodda waxaa lagu qeexi doonaa Xeerka Anshaxa ee ururka)
21. Magacaabista hanti-dhawrka.
22. Waxaa kale oo Guddiga Hogaaminta awoodeedda ka mid ah waajibna ku ah in ay dhammaystiraan Shuruudaha Ururka ee uu **Bar Association-ka** ku yahay Xeer ahaan iyo Xirfad ahaan.

## Qodobka 20aad: Qaab-dhismeedka Guddida Hogaaminta.

1. Guddida Hogaamintu waxay ka kooban yihiin **17 xubnood** oo lagu doorto shirweynaha Ururka, qaab-dhismeedkooduna waa sidan soo socota:-
   a) Gudoomiyaha.
   b) Guddoomiye ku-xigeenka 1aad.
   c) Guddoomiye ku-xigeenka 2aad.
   d) Xog-hayaha Guud iyo
   e) 13 Xubnood oo kale.
2. Guddida hogaamintu waxay yeelanayaan Guddi hoosaadyo.
3. Gudoomiyaha ururka ayaa magacaabaya dhamaan Gudoomiyeyaasha Guddi Hoosaadyadda Guddida Hogaaminta, qoraalna ku soo saaraya.
4. Guddida Hogaamintu waxay ka imanayaan lixda gobal doorasho, caasimaduna waxa leedahay dheeri.
5. Goboladdu waxay u kala leeyihiin Xubnaha Guddida Hogaaminta oo aanay ku jirin Guddida fulintu sidan soo socota:

a) Gobolka Tog-dheer (3) Xubnood.
b) Gobolka Awdal (2) Xubnood.
c) Gobolka Saaxil (1) Xubin.
d) Gobolka Sool (1) Xubin.
e) Gobolka Sanaag (2) Xubin.
f) Gobolka M/Jeex (5) Xubnood.

6. Gobol walba waxaa u banaan in ay ku tartamaan tiro ka badan xubnaha uu xaqqa u leeyahay si inta aan ku guulaysan tartanka ay u galaan liiska kaydka ah.

## Qodobka 21aad: Masuuliyadda Guddoomiyaha.

Masuuliyadda Gudoomiyaha waxaa ka mid ah:

1. Guddominta Shirarka Gudidda Hogaaminta fadhiyadda caadiga ah iyo fadhiyadda aan caadiga ahayn.
2. Ilaalinta ku dhaqanka Xeerka Ururka.
3. Sexeexidda Miisaaniyadda Ururka.
4. Kor joogtaynta hawl-maalmeedka Ururka.
5. Isugu yeedhista Xubnaha Gudidda Hogaaminta fadhiyadda caadiga ah iyo kuwa aan caadiga ahaynba.
6. Ilaalinta dhaqaalaha iyo hantidda ururku leeyahay in loo isticimaalay sidii ugu haboonayd ee loogu talagalay.
7. Jihaynta dhamaan masuuliyiinta ururka in ay qabtaan waajibaadyada loo xilsaaray iyo isu-duwidda wax-qabadyadda waaxyaha kala duwan.
8. Magacaabista Guddida qaban-qaabadda shirweynaha.
9. Magacaabista Gudoomiyeyaasha Guddi hoosaadyadda Guddida Hogaaminta.
10. Magacaabista Xubnaha matalaya Ururka ee ka mid noqonaya Waaxyaha Dastuuriga ah ee Dawladda, waxaana Gudoomiyaha ku waajib ah in uu si gaar ah u xaqiijiyo in xubnaha uu u magacaabayo Guddida Ruqsad-bixinta & Anshax-marinta Qareenaddu ay buuxiyeen Shuruudaha laga rabo Musharixiinta u tartamaya Xilalka Guddida Fulinta Ururka Qareenadda ee ku xusan **Qodobka 18aad xubintiisa(1)aad ee Xeerkan.**
11. Soo bandhigista warbixin xiliyeedka muddo xileedkiisa, warbixintaas oo ka kooban waxqabad, caqabado, guulo ururku gaadhay iyo soo jeedinta qorshayaal wax ku ool ah oo ay tahay in la qabto.
12. Matalaadda iyo ku hadlidda Magaca ururka iyo Masuuliyad kasta oo kale oo Xeer siinayo.

## Qodobka 22aad: Masuuliyadda Gudoomiye Ku-xigeenka 1aad.

Masuuliyadda Gudoomiye ku-xigeenka 1aad waxaa ka mid ah:

1. Haynta xilka Gudoomiyaha marka uu maqan yahay Guddoomiyaha Ururku.
2. Haynta xilka Gudoomiyaha haddii ay Gudoomiyaha ku timaado xaaladaha uu ku gudan kari waayo masuuliyadiisa sida xaalad caafimaado darro oo la soo darista.



somaliland lawyers association (SOLLA) Urur ka Qareenada

3. Haynta xilka Guddoomiyaha haddii uu Guddoomiyuhu ku sifoobo shuruud ka mid ah shuruudaha lagu waayo xubinimadda.
4. Qabashada iyo fulinta Hawlaha uu Gudoomiyuhu u igmado.

## Qodobka 23aad: Masuuliyadda Gudoomiye Ku-xigeenka 2aad.

Masuuliyadda Gudoomiye ku-xigeenka 2aad waxaa ka mid ah:

1. Haynta xilka Gudoomiyaha marka ay maqan yihiin Guddoomiyaha iyo Gudoomiye ku xigeenka 1aad ee Ururku.
2. Haynta xilka Gudoomiye ku xigeenka 1aad marka uu Maqan yahay Gudoomiye ku xigeenka 1aad ee Ururku.
3. Haynta xilka Guddoomiye ku xigeenka 1aad haddii uu Gudoomiye ku xigeenka 1aad ku sifoobo shuruud ka mid ah shuruudaha lagu waayo xubinimadda ama gudan karo waayo masuuliyadiisa xaalad caafimaad darro oo la soo daristay awgeed.
4. Buuxinta Jagadda Xog-hayaha Guud haddii ay banaanaato jagadiisu inta laga gaadhayo Shirwaynaha Ururka ee lagu dooranayo Xog-haye Guud oo cusub.
5. Qabashada iyo fulinta Hawlaha uu Gudoomiyaha Ururku u igmado.

## Qodobka 24aad: Masuuliyadda Xog-hayaha Guud.

Masuuliyadaha xoghayaha guud waa:

1. Iclaaminta iyo faafinta mudooyinka la qabanayo shirarka caadiga ama kuwa aan caadiga ahayn ee Guddida Hogaaminta.
2. Qaadista hadal-qoraalka kulamadda iyo soo saarista go'aanadda ka soo baxa fadhiyadda Guddida hogaaminta isagoo gaadhsiinaya dhinacyada ay tahay in la gaadhsiiyo.
3. Isagoo ku shaqaynaya tilmaamaha iyo ogolaanshaha Guddoomiyaha ama go'aanka gudidda hogaamintu gaadhay, waxa uu u xilsaaran yahay meel marinta hawl maalmeedka guddida hogaaminta iyo hawlaha kale ee mudan in la qabto.
4. Haynta diiwaanka Qareenadda iyo qabashadda codsiyadda xubinimadda Qareenadda.
5. Qabashada is casilaadaha xubnaha Gudida hogaaminta iyo xubnaha kale ee ururka.
6. Qabashada codsiyadda Guddida hogaamintu ku dalbanayso kulan ama fadhi aan caadi ahayn.
7. Qabashada codsiyada xubnaha guud ku dalbanayaan shirwayne aan caadi ahayn marka ay buuxiyaan koramka.
8. Xog-hayaha Guud waa inuu ku gaadhsiiyaa dhamaan hawlaha farqadaha sare ee Qodobkan Gudoomiyaha ururka sida ugu dhakhsaha badan ee suurta galka ah.
9. Shir-guddoominta Guddida Hogaaminta iyo magacaabista Guddida qaban-qaabadda Shir-waynaha haddii ay hal mar wada baneeyaan Boosaskooda Gudoomiyaha Ururka, Gudoomiye Ku-xigeenka 1aad ee Ururka iyo Gudoomiye Ku-xigeenka 2aad ee Ururka.
10. Wixii kale ee shaqo ah ee uu Gudoomiyuhu u xilsaaro si waafaqsan Xeerkan.

## Qodobka 25aad: Fadhiyadda Guddida Hogaaminta.

Guddida Hogaamintu waxay yeelanayaan fadhiyo caadi ah oo (3) saddex biloodle ah:

1. Fadhiyada Gudidu waxay ku qabsoomayaan marka la helo Kooram buuxa.
2. Kooramku waa (kalabadh+1) xubnaha Guddida Hogaaminta oo dhan.
3. Gudida Hogaamintu waxay yeelan karaan fadhiyo aan caadi ahayn oo ku iman kara:
   a) Marka Gudoomiyuhu isugu yeedho.
   b) Marka 5 xubnood oo ka mid ah Guddida Hogaaminta ay dalbadaan, una soo gudbiyaan dalabkooda oo sababaysan Guddoomiyaha Ururka, kadibna Guddoomiyaha Ururku mar u helo dalabkaa iskugu yeedho.
4. Waxaa xubinta Guddida hogaaminta u banaan in ay fadhiyadda Guddida hogaaminta kaga qayb-gasho qaabka fogaan-arragga **(Zoom Meetings)**, arragtidiisa iyo doodiisana halkaa ka dhiibto.

## Qodobka 26aad: Waayidda Xubinnimada Guddida Hogaaminta & Habka Buuxinteeda.

1. Waxaa lagu waayi karaa xubinnimada Gudida Hogaaminta xaaladahan:
   b) Is casilaad;
   c) Geeri;
   d) Inuu ka soo xaadiri waayo 3 fadhi oo caadi ah oo isku xiga cudur daar la'aan.
   e) Inuu ku dhaco xukun ciqaabeed oo kama dambays ahi oo ay ku rido Maxkamad sharci ahi ama uu ku dhaco xukun anshaxmarineed oo gaadhsiisan in laga joojiyo ku shaqaysiga mihnadda Qareenimo.
   f) Inuu gudan kari waayo shaqadda sabab caafimaad darteed.
   g) Haddii loo magacaabo ama uu qabto xil Qaran (Garsoorka, Fulinta & Sharci dajinta).
   h) Guddomiyaha, Ku-xigeenadiisa iyo Xog-hayaha Guud waxaa u gaar ah oo ay xilka ku waayi kataan haddii loo magacaabo xil Shirkadeed, Hay'ad caalami ah ama wadani ah.
   i) Waxaa kale oo ay Xubinta Guddiga Hogaamintu xilka ku waayi kartaa haddii ay ku sifoowday Xaaladdaha ku xusan **Qodobka 10aad** ee Xeerkan oo ah Waayidda Xubinimadda.
2. Xaaladahaasi kor ku xusan marka ay ku yimaadaan xubin ka mid ah Guddida Hogaaminta, waxaa soo jeedin kara xubin kasta oo ka mid ah Gudida Hogaaminta.
3. Marka laga reebo Gudoomiyaha iyo Ku-Xigeenadiisa, Waxaa lagu ansixinayaa waayitaanka xubinta ay ku timaado ama ku sifowda sababaha kor lagu soo sheegay cod-bixin ay u qaadaan Guddida hogaaminta oo yeesha fadhi ugu furma si xeerkan waafaqsan, waxaanay cod-bixintaasi ku ansaxaysa cod hal dheeri (Simple majority).
4. Marka ay banaanaato Boos ka mid ah Guddiga Hogaaminta oo aanay ku jirin Guddida Fulintu waxaa laga soo buuxinayaa Liiskii Xubnaha kaydka ahaa iyadoo loo eegayo Gobolka ay xubintu ka banaanaatay iyo sida ay u kala cod badnaayeen, Guddoomiyaha



somaliland lawyers association
Ururka Qareenada Somaliland

Ururka ayaana qoraal ku soo saaraya xubinta soo buuxisay Booskii banaanaaday.

5. Haddii Goboladda Qaarkood laga waayo Xubno kayd ah ama ay dhamaadaan xubnahii kaydka ahaa waxaa ku go'aan gaadhi doona qaabka buuxinta jagadda banaanaatay Guddida Hogaaminta Ururka (BoD).
6. Xaaladdaha waayitaanka xubinimadda Guddiga Hogaaminta hadii ay ku yimaadaan Gudoomiyaha, Waxaa xilkiisa sii haynaya Gudoomiye Ku-xigeenka 1aad inta laga gaadhayo Shirweynaha Ururka.
7. Haddii Xaaladdaha waayitaanka Xubinimadda Guddiga Hogaaminta ay ku timaado Gudoomiye ku xigeenka 1aad, waxaa xilkiisa sii haynaya Gudoomiye ku xigeenka 2aad inta laga gaadhayo Shirwaynaha Ururka.
8. Haddii Xaaladahaasi midkood ku timaado Gudoomiyaha iyo Ku-xigeenadiisaba, mudadii kastaaba ha ka hadhsanaato Shirweynaha xiga'e, waxaa la qabanqaabinayaa Shirweyne aan Caadi ahayn, oo lagu dooranayo Gudoomiye iyo Ku-xigeenadiisa, Waxaana hawshaas yeelanaya xubnaha Guddida Hogaaminka oo uu Shir-gudoominayo Xog-hayaha Guud.
9. Haddii ay dhamaantood baneeyaan Guddida Fulintu boosaskooda waxaa shir degdeg ah iskugu imanaya xubnaha kale ee Guddida Hogaaminta, iyadda oo uu Shirgudoomin doono Xubinta ugu da'da wayni, waxayna iska dhex-dooranayaan Gudoomiye iyo Xog-haye.
10. Gudoomiyaha iyo Xog-hayaha la doortay waxay ku qaban doonaan muddo aan ka badnayn (3) bilood Shirwayne lagu soo doorto Guddi Hogaamineed oo cusub.

## Qodobka 27aad: Agaasinka Fullinta ee Ururka.

1. Ururku wuxuu yeelan doonaa Agaasin Fullineed oo ka kooban:
   a) Agaasimaha Fulinta.
   b) Madaxyadda qaybaha.
   c) Shaqaalaha kale.
2. Agaasinka Fullintu waxay u xilsaaran yihiin fulinta hawl-maalmeedka ururka, iyagoo raacaya qorshaha iyo nidaamka ay u dejiyeen Gudidda Hogaamintu.
3. Agaasinka fullinta waxaa hogaaminaya Agaasimaha Fullinta (Executive Director), waxaanu ku shaqayn doonaa tilmaamaha guddida Hogaaminta, isagoo fulinaya siyaasaddaha ay u dajiyeen Gudida Hogaamintu.
4. Xubnaha ama Shaqaalaha Agaasinka fulinta waxa lagu qaadan doonaa nidaamka shaqo qorista u degsan ee ururka, oo ay dajiyeen Gudida Hogaamintu.
5. Xubnaha guud ee ururku way buuxin karaan jagooyinka Agaasinka Fulinta, haddii loo baahdo, waxa se shardi ah in loo maro nidaamka shaqaalaynta ee ururka.
6. Guddida hogaamintu way ka reeban tahay qabashada xilalka Agaasinka Fulinta.



somaliland lawyers association · Ururka Qareenada

## Qodobka 28aad: Musuuliyadaha Agaasinka Fulinta.

Masuuliyadaha iyo waajibaadka Agaasinka Fulinta waa:

1. Fullinta hawl-maalmeedka ururka, ka dib marka ay ansixiyaan Gudida Hogaaminta.
2. Fullinta iyo meel marinta qorshaha iyo istaraatijiyada u degsan ururka.
3. Fullinta mashaariicda iyo hawlaha ururka si waafaqsan Xeerkan iyo Siyaasadaha uu u dejiyey Gudida Hogaamintu.
4. Ku shaqaynta iyo U hogaansanaanta nidaamka shaqo ee uu u dejiyo Agaasimuhu (ED).
5. Inay siiyaan Agaasimaha warbixinaha joogtada ah ee Shaqada loo xilsaaray.

## Qodobka 29aad: Masuuliyadda Agaasimaha Fullinta (Executive Director)

Masuuliyadda Agaasimaha Fulintu waa:

1. Maamulidda hawl maalmeedka ururka iyo qaybaha kala duwan ee Agaasinka Fulinta.
2. Agaasimidda iyo maamulidda hantida ururka mid dhaqaale, qalab iyo xafiis si waafaqsan xeerkan.
3. Diyaarinta Miisaaniyad sanadeedka Ururka, isagoo hor gaynayaa Guddida Hogaaminta si ay uga doodaan una ansixiyaan.
4. Soo jeedinta Iyo diyaarinta Kharashaadka ururka iyo soo jeedinta ansixintoodda.
5. Diyaarinta warbixin Xiliyeedka oo uu u gudbiyo Gudida Hogaaminta.
6. Marka ay Gudida Hogaamintu u igmaddaan, Agaasimaha Fulintu wuu ku matali karaa ururka shirarka maxaliga ah ama kuwa caalamiga ah.
7. Isku xidhka Xarunta Guud ee Ururka iyo Xarumaha Goboladda.
8. Soo gudbinta Warbixinta Xafiisyadda Goboladda ee ururka oo uu u gudbinayo Guddida Hogaaminta.
9. In uu si dhaw ula shaqeeyo dhamaan Hay'addaha uu ururku wada shaqaynta la leeyahay.
10. Raadinta, Diyaarinta iyo qorista Mashaariicda ururka isagoo kaashanaya qaybaha Agaasinka ama khubaro ku xeel dheer.

## Qodobka 30aad: Masuuliyadda Madaxa Barnaamijyadda.

Madaxa Barnaamijyadu wuxuu leeyahay masuuliyadahan:

1. Kala shaqaynta Agaasimaha fulinta mashaariicda ururka si loogu raadiyo ciddii maal galin lahayd.
2. Diyaarinta hawl bileedka.
3. Abuuridda barnaamijyo wax ku ool ah si loogu daro qorshaha ururka.
4. Dhamaan hawl kasta oo uu u igmado Agaasimaha fulintu.

## Qodobka 31aad: Masuuliyada Madaxa Maamulka Iyo Lacagta.

Agaasimaha Maamulka iyo lacagtu wuxuu leeyahay masuuliyadahan:



Somaliland lawyers association (SOLLA) Ururka Qareenada Somaliland

1. Maamulidda maaliyadda ururka isagoo raacaya nidaam maaliyadeedka ururka.
2. Xafiddida hab xisaabeedka iyo illaalinta buugaagta xisaabta.
3. Ka gacan siinta agaasimaha fulinta ee diyaarinta kharashka.
4. Fulinta Miisaaniyadda ay ansixiyaan Golaha Hogaamintu.
5. Diyaarinta warbixin xisaabeedka Bilaha ah, Sadexbiloodlaha ah iyo Sanadlaha ah.

## Qodobka 32aad: Laamaha Ururka.

1. Ururku wuxuu ku leeyahay laamo Goboladda Jamhuuriyadda Somaliland ka dib marka Qareeno ururka ka mid ahi joogaan kana shaqeeyaan Gobolkaas, sidaana ku soo codsadaan in loo aqoonsado Laan.
2. Guddida hogaaminta ayaa dejinaysa qaab dhismeedka Laamaha Goboladda.
3. Laamuhu way u isticimaali karaan qaadhaanka ama dhigaalka ay bixiyaan xubnahoodu kharashaadka Laanta si waafaqsan nidaamka maamulidda dhaqaalaha ee Ururka, waana in ay Xarunta dhexe u soo diraan warbixin saddex-biloodle ah.
4. Mar walba laamuhu waxay u gudbin karaan Gudida Hogaaminta baahiyahooda ama duruufaha la soo dersa, iyagoo warbixinta usoo marinaya Agaasimaha Fulinta (ED).
5. Laamaha ururku kuma hadli karaan magaca Ururka iyaga oo aan ogolaansho ka haysan Hogaanka Ururka.
6. Waxaa kale oo ka reeban Laamaha ururka wax kasta oo ka hor imanaya ujeedooyinka iyo siyaasaddaha ururku u taagan yahay.

## Qodoka 33aad: Qaybaha iyo Waaxyaha.

1. Ururku waxa uu yeelanayaa waaxo iyo qaybo si uu si sahlan ugu gaadhi karo ujeedooyinkiisa iyo himilooyinka uu hiigsanaayo, waxaana awood u leh samaynta waaxyaha Gudiga hogaaminta.
2. Uma banaana waaxyaha iyo masuuliyiinta waaxyaha in ay sameeyaan ficilo ay ku matalayaan magaca ururka.

## Qodobka 34aad: Dhaqaalaha Ururka.

Ilaha dhaqaalaha ururku waa:

1. Qaadhaanka Bil'laha ah ee xubnaha Ururka.
2. Tabarucaadka iyo hibooyinka aan shuruudda lahayn.
3. Maal-gashi ururku sameeyo.
4. Mashaariicda.

## Qodobka 35aad: Hantidhawrka ururka.

Ururku wuxuu yeelanayaa Hantidhawre madaxbanaan oo ka iman kara gudaha ama dibadda.

## Qodobka 36aad: Shaqadda Xilalka Ururka.

1. Xubnaha loo magacaabo Xilalka kala duwan ee Ururka wax gunno ah kuma mutaysanayaan, hawshooduna waa tabaruc.
2. Waxaa ka reeban xubinta 1aad ee Qodobkan wixii kharash hawleed ah ama sahay Safar ah ee ku baxaya xubnaha xilalka u haya ururka markay fulinayaan hawlaha ururka, waxaana laga bixinayaa dhaqaalaha Ururka.
3. Xubinta 1aad ee Qodobkani ma saamaynayso mashaariicda Ururku fulinayo, hawl wadeenadda Mashruuca ee ururka xubnaha ka ah mashruuc ay uga qoondaysan tahay gunno/khidmad ama mushahar hawleed.

## Qodobka 37aad: Wax ka bedelka Xeerka Ururka.

1. Wax ka bedelka Xeerka ururka waxaa soo jeedin kara saddex meeloodoow laba meelood **(2/3)** xubnaha Guddida hogaaminta ama Saddex Meeloodoow hal meel **(1/3)** xubnaha Ururka.
2. Wax ka bedelka Xeerku wuxuu ku ansaxayaa cod hal dheeri ah xubnaha Shirwaynaha.
3. Awoodda Wax ka bedelka Xeerku waxay gaar u tahay Shirwaynaha Ururka, waxaana reeban in ay cid kale u wareegto.

## Qodobka 38aad: Aasaasayaasha Ururka.

Aasaasayaasha Ururka waxaa loo aqoonsan yahay xubnahii ka qaybgalay Shirwaynahii 1aad ee Ururka Qareenadda Somaliland (SOLLA).

## Qodobka 39aad: dhaqan-galka Xeerka Ururka.

1. Xeerkani wuxuu baabiiyey Xeerarkii ka horeeyey ee lagu ansixiyey Shirwaynahii 2aad iyo Shirwaynahii 3aad ee Ururka, Xeer kasta oo ka soo horjeedaana waa waxba kama jiraan.
2. Xeerkani wuxuu dhaqangalayaa marka shirwaynaha Ururku cod ku ansixiyo.

## Xubnaha Shir-Gudoonka Shirwaynaha 6aad

1. **Cali Siciid Jaamac (Gudoomiye)**
2. **Siciid Max'uud Obsiiye (Gudoomiye Ku-Xigeen)**
3. **C/risaaq Saalax Xasan (Xog-haye)**

somaliland lawyers association (SOLLA) Ururka Qareenada Somaliland